Inspectional Services

# KIJOOYINKA GURIGA EE TAFAARIIQDA AH

*Baro wax badan oo ku saabsan oggolaanshaha iyo Xeerka Kijooyinka Guriga ee Tafaariiqda.*

Waxaad sidoo kale la xidhiidhaa Waaxda Caafimaadka si loo qabsado ballanta qorshaha dib u eegida.

---

Janaayo 2021 Magaalada Boston waxay gudbisa xeerka, in *La dhiso Hagitaanada Oggolaanshaha Kijooyinka Guriga ee Tafaariiqda ah* ee oggolaanaya dadka gaarka ah ee degen inay sameeyaan oo qaybiyaan cuntooyinka aan khatarta ahayn ay ku jiraan laakiin kuma xadidna: alaabta la dubay, jaamka, jeliyada, xalwadaha, iyo isku darka xawaashyada qalalan. Contooyinka guriga lagu sameeyo ee loo oggolaaday iibka waxaa ku jira cuntooyinka aan khatar suuragal ah ahayn ee aan u baahnayn kullayn ama qabow hayn ah badbaado ahaan.

Codsadayasaahu dhowraya inay ka hawl galaan kijada tafaariiqda ah ee guryahooda waa inay la xidhiidhaan Boston Inspectional Services,  Waaxda Caafimaadka oo ay dhammaystiraan nidaamyada soo socda: gudbinta iyo dib u eegida qorshayaasha, gudbi codsiga la dhammaystiray oo aqbal nidaamka baadhida. Riix halkan macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan qorshaha dib u eegida Kijada Guriga ee Tafaariiqda ah, codsiga iyo nidaamka baadhida.

## KU SAABSAN SHARCIGA

Hadafyada Waaxda Adeegyada Kormeerka waa kuwa loo siman yahay iyo ka bogsasahda waarta ee COVID-19. Ilaa dhammaadkaas, waxaanu diyaarinay haykalka sharciga ah iyo oggolaanshaha soo saarida cuntadda ee ganacsiyada yaryar gudaha kijada guriga.

Kijinada guriga ee tafaariiqda ah ma diyaarin karaan alaabta dhammaatay ee u baahan haynta kulul iyo qabow wixii badbaado ah. Kuwan waxaa ka mid ah:

- hilibka ama kalluunka qaydhin ama la kulayliyay
- jarida gaarka ah ee soo saarida ay ku jiraan qaraha, iyo
- cagaarka caleen leh, iyo tamaandhooyin

Dhammaan kijooyinka gurigu waa inay u hogaansamaan Xeerka Sixada Gobolka Massachusetts 105 CMR 590.

# SIDA LOO CODSADO

## CODSASHADA OGGOLAANSHAHA

Oggolaanshaha kijada guriga ee tafaaqiiqda ah waxaa looga baahan yahay hoy kasta oo danaynaya inuu diyaariyo "cuntadda guriga", ama cuntooyin kasta oo kale oo loo arko inay oggolaan karto Waaxda caafimaadka. Kuwan waxaa ka mid ah, laakiin kuma xadidna, alaabta degen ee khaanada sida:

- nacnaca iyo waxyaabaha la dubo
- jeeliga iyo doonadka
- khalka, iyo
- cuntooyinka kale ee aan khatar suuragal ah ahayn.

Si loo bilaabo, soo deji oo buuxi codsiyadan:

**QORSHAHA DIB U EEGIDA OGGOLAANSHAHA KIJADA**

**CODSIGA OGGOLAANSHAHA CAAFIMAADKA**

## KU DAR KUWA SOO SOCDA CODSIGAAGA:

- Koobiga warqada ama iimaylka ka yimid mulkiilaha dhismaha xaqiijinaya inay qirtaan ganacsiga inuu ka shaqaynayo meel ka baxsan dhismahoda.
- Labba qaybood oo qorshayaal ah (cabirka ugu ayar: 11 hiish ilaa 17 hiish)
- Xaashida shaqada codsiga Qorshaha Dib u eegida Kijada Guriga ee Tafaariiqda ee la dhammaystiray
- Koobiga liiska la soo jeediyay ee muujinaya sheeyada aad diyaarinayso
- Koobiga shahaadada Tababarka Wacy gelinta Xasaasiyada waxayaabaha keena
- Shahaadada sidi maareeyaha ilaalinta cuntada
- Shahaadada Tababarka Wacy gelinta Cuntadda Xasaasiyada waxayaabaha keena
- Kijada Guriga ee Tafaariiqda Qayba Caafimaadka Kharashka ($100)

Waxaad iimayl ku soo diri kartaa codsiga iyo dhokumentiyada ISDHealth@boston.gov. Haddii aad qabto su'aalo la xidhiidh Health Division lambarka 617-635-5326 ama ISDHealth@boston.gov

# NIDAAMKA QORSHAHA DIB U EEGIDA

Nidaamka qorshaha dib u eegida

Ka hor bixinta oggolaanshaha, dhammaan kijooyinka guriyaha waa inay soo gudbiyaan qorshayaashooda iyo qorshayaashana waa inuu dib u eegaa kooxdayadu. Dib u eegida qorshahaaga, waxaanu awoodnaa inauu bixino isku eekaanshe wayn iyo waxaanu bixinaan caawimo farsameed. Qiimaymahan waxay lama huraan u yihiin guudha macmiilka iyo iska ilaalinta dhibaato soo baxda mustaqablaka.

Nashqada liidata, dib u samaynta, iyo dayactirka waxa uu aqbali doonaa goobtaada iyo hawlaheeda. Qiimayntayada qorshaha, waxaanu doonaynaa inaanu xaqiijino in goobtaada si sax ah loo nashqadeeyay oo dhaqamada sixada caafimaadkuna ay diyaar yihiin.

Waxaanu bixinaa dib u eegida dhammayska tiran ama hawl galada aad soo jeedisay:

- qorshayaasha dib u eegida
- baadhitaanka dhismaha
- baadhitaanada hawl galada ka horeeya, iyo
- nidaamka bixinta oggolaanshaha.

Qiimayntayada, waxaanu adkaynta saarnaa:

- waxa uu ka kooban yahay qorshayaashaadu
- sifooyinka qalabka
- nashqada dhismaha, iyo
- nidaamyada hawlgaleed.

Hadafkayagu waa in laga hortaggo cudurada cuntaddu qaadaan ee ka yimaada goobta nashqada sixada ama qorshayaasha sagxada, ama labbadaba.

## KU SAABSAN QORSHAHA DIB U EEGIDA

Markaad soo gudbiso qorshahaaga qiimaynta, hubso inaad ku darto:

- qalabka qoran ee ku yaala qorshayaasha sagxada, iyo
- sifooyinka dhammaystirka iyo qasabadaha.

Ay ku jiraan macluumaadkan waxa uu muujin doonaa dhibaatooyinka suuragalka ah ee warqadda ku yaala. Sidoo kale waxay kuu oggolaan kartaa si loo sameeyo habbaynta ka hor inta aanad samayn iib kasta oo qaali ah ama rakibida, ama  waxay samaynta dhismaha.

## SOO DEJI:

**QORSHAHA DIB U EEGIDA KIJADA GURIGA**

*Waxaanu qaban karnaa qiimaynaha ballan oo keliya La xidhiidh Waaxda Caafimaadka lambarka [617-635-5326] ama [ISDHealth@boston.gov].*

# SHURUUDAHA IYO NIDAAMYADA

*Kijooyinka guriga ee tafaariiqda ah ee ka hawl gelaya Boston waa inay helaan baadhitaanka sanadlaha ah ama aan tooska ahayn ee Adeegyada Baadhitaanka Waaxda Caafimaadka. Hawl wadeenadu waa inay raacaan oo ay buuxiyaan nidaamyada hawl galeed iyo shuruudaha baadhitaanka:*

## IIBKA:

Cuntaddu waa in laga iibsado iibiyaha gobolku ansixiyay.

## KAYDKA

Waxaa lagaaga baahan yahay inaad lahaato kayd gooni ah oo qalalan iyo kadyka qaboojiyaha ah ee ganancsiga iyo sheeyada cuntadda gaarka ah gudaha kijada. Isticmaal khaanad gooni ah ama goob loo qoondeeyay ganacsiga cuntadda ka goonida ah cuntadda gaarka ah.

## CALAAMADAYNTA

Ku xidhida baako ama calaamadaynta cuntadda waa inay buuxisaa shuruudaha sare lagu sheegay ee 105 CMR 520.00 ee calaamadaynta. Kuwan way ka duwan tahay tafaariiqda iyo jumlada. Waxaad dib u eegi kartaa Waaxda Caafimaadka Dad waynaha Massachusetts oo kooban ee shuruudaha calaamadaynta cuntadda ku jirta baakada.

## SIXADA

Waxaa inaad raacdaa kuwa isku mid ah:

- caafimaadka
- sixada
- gacmo dhiqista, iyo
- shuruudaha isticmaalka musqusha kuwan u baahan heerka kijada ganacsiga.

## QALABKA IYO WEELKA

Dhammaan qalabka iyo weelku waxay u baahan yihiin in laga dhigo qalab badbaado ah oo lagu ilaaliyo dib u samayn wanaagsan.

## OOGOOYINKA XIDHIIDHKA CUNTADDA

Dhammaan oogooyinka cuntaddu taabatay waxay u baahan tahay inay debecsanaato, alaab aan waxba nuugin oo si fudud loo nadiifiyo. Tan waxaa ka mid ah miisaska, suxuunta, iyo oogooyinka shaqada. Xaga sare ee miiska aan lahayd dilaacyo. Shay kasta oo cuntadaas ah oo taabta waa inaya woodaa in si sax ah loo nadiifiyo oo jeermiska looga dilo.

## NADIIFINTA IYO SIXADA

Sharciyo isku mid ah ayaa la adeegsan doonaa nadiifinta iyo sixo wanaajinta sida kijada ganacsiga. Laakiin, waxaa jira qaybo filashooyinka khasaaraha ee oggolaada isticmaalka suxuun dhaqaha guriga, ilaa inta:

- goobta sixada ugu wanaagsan ee suuragalka  ee mishiinka la isticmaalay, iyo
- heerkulka sare u kacay ilaa 150 darajo. Tani waxay u baahan tahay in la baadho maalin kasta, iyadodo diiwaanada la hayo ilaa 30 maalmood.

## SHAQAALAHA IYO DILAALIINTA

Keliya xubnaha dhow ee qoyska ee ku nool guriga gudahiisa ayaa u diyaarin kara cuntadda iib. Ma jiraan shaqaalae dibada ah oo la isticmaalayaa. Dilaaliinta, jumladlayaasha, ama bakhaarada lama isticmaali karo.

## CAYAYAANKA IYO JIIRKA

Sida kijo kasta, waa inaad qaadaa tallaabooyinka la isaga ilaaliyo ku haysashada cayayaan iyo jiirka gudaha kijada.

## XAWAYAANKA RABAAYADA AH

Waa inaad ka saartaa xawayaanka rabayaada kijada muddada diyaarinta cuntadda.

## DHARMAYDHKA

Dhar ma maydhi karti muddada diyaarinta cuntadda.

## MARTIDA

Kijada iyo goobaha kaydka cuntyadda ma isticmaali karaan martida marka cuntadda loo diyaarinayo ganacsiga.

## QASHINKA

Qasacadaha loo isticmaalay qashinka waa inay daboolo lahaandaan u xidhmo si adag

## TABABARKA

*Dadka oggolaanshaha haysta waa inay helaan Shahaadada Tababarka Wacyi gelina Cuntadda Waxyaabaha xasaasiyada dhaliya. Tani waa inay ka timaada goob oggolaansha haysata oo laga aqoonsan yahay gudaha Massachusetts oo buuxisa dhammaan shuruudaha. Kooxdayadu waxay ku ogaysiin doontaa wax ku sabasan:*

- *macluumaadka badbaadada ku saabsan sharciyada shaqada*
- *tilmaamaha badbaadada dabka, iyo*
- *qaybta 105 CMR 590 ee Xeerka Sixada Gobolka Massachusetts.*